# FARIINTA WAALIDIINTA IYO DARYEELLAYAASHA

Fariin ku socota waalidiinta iyo daryeellayaasha Gobolka iyo degaanada Victoria (Mitchell Shire kuma jirto)

Mudanayaal waalid iyo daryeelayaal,

Sidaad la socoto, Xukuumada Fiktooriya waxay samaysay baaq muhiim ah xagga qabanqaabada dugsiyada Fiktooriya gudaheeda teeramka saddexaad.

Iyada oo ku salaysan talada Sarkaalka Madaxa Caafimaadka, Dugsiyada Xukuumada Fiktooriya ee ku yaalla Melbourne nawaaxigeeda iyo Mitchell Shire waxay yeellan doonaan qabanqaaba mucayina Asbuuc gudahiis Teeramka 3aad sida hoos lagu sharxay. Dugsiyadu waxay u gudbi doonaan barashada durugsan iyo barashada rogroganta ee ardada ku jirta bareeb ilaa ardada sanadka 10aad bilawga asbuuca 2aad.

Waa muhiim in la ogaado in talada Sarkaalka Madaxa Caafimaadku ay tahay in dugsiyadu sii wadi karaan inay shaqeeyaan. Sarkaalka Madaxa Caafimaadka ayaa sidoo kale bixiyey talo ku saabsan talaabooyinka caafimaadka oo ay tahay inay qaadaan shaqaalaha iyo ardadu, waana la soconaynaa ariintaas.

Ujeedada bedelida qorshahaani waa in hoos loo dhigo tirada ardadaan – iyo waalidiintooda iyo masuuliyiintooda – loona gudbo nawaaxiga Melbourne iyo Mitchell Shire si hoos loogu dhigo fiditaanka coronavirus (COVID-19).

Si kasta ha ahaatee, waa muhiim in waxbarashada ku salaysan is-horfadhiga ah (face-to-face) loo sii wadi doono ardada qaarkood. Taas waxaa ku jirta in sanadka 11aad iyo 12aad (ardada sanadka 10aad ee ku jira waxbarashada VCE ama VCAL nooca barnaamijkooda waxbarasho) waxaana sabab u ah muhiimada u leedahay u suurtagelinta dhamaan ardadu inay sii wadaan ama buuxiyaan shahaadooda dugsiga sarre, midkooda VCE ama VCAL.

Waa muhiin in ardada ku jirta dugsiyada takhasuska ahi u leeyihiin xaq aqoonta macalimiinta iyo kaalmada shaqaalaha dugsiyadaas ku salaysan is-hor fadhiga. Waxaan kaloo u baahanahay in aan kaalmayno qoysaska halkaas oo waalidiinta iyo daryeelayaashu aanay ka shaqayn karin guriga, iyo kuwa kale ee u baahan kaalmada goobta taas oo goob ku bixintu u suurtagelinayso.

Si loo bixiyo balanqaad siyaada ah, dugsigeena, oo la socdaan dhamaan dugsiyada dawlada ee ku yaalla nawaaxiga Melbourne iyo Mitchell Shire, waxay qaadi doonaan baarista kulaylaha dhamaan ardada subaxii. Haddii ilmuhu leeyahay kulayl (xaraarad), waxaa lagu weydiin doonaa inaad dugsiga ka kaxayso.

Qorshaha cusub waxaa lagu faahfaahiyey hoose.

**Isniinta 13ka ilaa Jimcaha 17ka Juulay**

Ardada sanadaha 11aad iyo 12aad, ardada sanadka 10aad waxay fulinayaan waxbarashada VCE iyo VCAL, ardada ku qoran dugsiyada khaaska ah, waxay ku noqon doonaan Isniinta 13ka Juulay.

Maalinta Isniinta 13ka – ilaa Jimcaha 17ka Juulay waa fasax ardada dhigata bareebka ilaa sanadka 10aad. Ardadaas fasaxa ah maalmahaasi waxay u suurtagelinayaan shaqaaluhu inay u

diyaar garoobaan bedelaada waxbarashada durugsan iyo tan rogroganta laga bilaa Isniinta 20ka Juulay.

Waxaanu bixin doonaa barnaamijka ku kormeerida ardada goobta kuwaas oo u baahan inta lagu jiro asbuucaan. Barnaamijkaas waxaa helli kara ardada waalidiinta/daryeelayaashu aanay ka shaqan karin guriga qorsha kalena aanay suurtagal ahayn iyo ardada u nugul dhibta.

Si loo caawimo qorshaheena, haddii aad u baahan tahay barnaamijkaa, fadlan la xiriir dugsigayaga.

Qorshahaas ayaa ka jiri doona dhamaan dugsiyada nawaaxiga Melbourne iyo Mitchell Shire.

**Isniinta 20ka Juulay iyo wixii dambeeya**

Laga bilaabo maalinta Isniinta 20ka Juulay, dugsigayagu wuxuu aadi doonaa habka durugsan iyo barashada rogroganta. Taasi waxay khusaynaysaa dhamaan ardada marka laga saaro kuwa soo socda:

- Sanadaha 11aad iyo 12 aad iyo kuwa 10aad ee barnaamijyada VCE iyo VCAL
- Ardada ku qoran dugsiga takhasuska ah

Ardada soo socotaa waxay awoodaan inay yimaadaan dugsiga iyaga oo la kormeerayo, laakiin sidoo kale waxay fulinayaan barnaamijyada barashada durugsan:

- carruurta waalidiinta/daryeellayaashu aan samayn karayn qorshayn ku haboon si ay ugu kormeeraan carruurta guriga, kuwaas oo ay ku jiraan carruurta leh macalimiinta dugsiyada dawlada kuwaas oo looga baahan yahay inay ku noqdaan goobta shaqada
- ardada u nugul dhibta
- ardada iinta leh kuwaas oo doortay inay tagaan goobta.

Waan la socon doonaa qabanqaabada kuwa aanu ku meelaynay waxbarashada durugsan oo rogroganta ee teeramka 2aad.

Wasaaradu waxay leedahay xalal kala duwan si aad adigu u sii wado kaalmada ardadaada xagga barashadooda, waxa laga hellaa websaytaka Guri Ku-Barashada (*Learning from Home)* websaytka education.vic.gov.au/homelearning.

Macluumaadkii ugu dambeebyey oo ku saabsan coronavirus (COVID-19) iyo dugsiyada laga hello websaytka Wasaarada waxbarashada: education.vic.gov.au/coronavirus

Sarkaalka Madaxa Caafimaadka Fiktooriya ayaa ta'kiidiyay in isticmaalka maaska ama isdaboolka waalidiinta iyo carruurta aan dugsiyada lagula talinayn waqtigaan. Sidii ay mar walba ahayd, ardada doonaysa inay u qaataan maaska dugsiga markay dugsiga ku soo socdaan iyo markay ka sii socdaan ayaa sidaas samayn kara.

Ugu dambayn, waxa xasuusin ah haddii adiga ama ilmahaaga, ama xubin qoyska ka mid ah ay yeeshaan astaamahaan sida qandhada, qabowga ama dhidid, qufac, cuna xanuun, neefsiga oo kugu yar, biya sanka ka socda, urka ama dhadhanka oo kaa taga, waa in lagaaga baaraa coronavirus (COVID-19) goobta baarista gurigana la joogaa.

Tani aad ayay muhiim u tahay xagga ilaalinta amniga bulshada dugsiyada.

Haddii aad jeclaan lahayd macluumaadka caafimaadka ee Wasaarada Caafimaadka iyo Adeegyada Aadamiga (Department of Health and Human Services) waxaad booqan kartaa websaytka: dhhs.vic.gov.au/coronavirus


VICTORIA State Government | Education and Training